T

| | XEERKA GUDDIGA<br>**Ardayga Ka hortaga Dhibaateynta iyo Xeerka Rabshada Shukaansiga** | **4.30.060-P** |
|---|---|---|

## I. Dulmarka iyo Baaxada

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an inay bixiyaan jawi waxbarasho badqab, fiican, oo wax soo saar leh iyo jawi shaqo. Dhibaateynta, oo ay ku jiraan cabsi gelinta ama xoog sheegsiga, xoog sheegsiga intarneetka, iyo dhibaateynta galmada, oo ay ku jiraan rabshada shukaansiga dhaliinta iyo rabshada qoyska, ayaa si adag u mamnuuc ah oo waa inaan loo dulqaadan.

Xeerkaan wuxuu quseeyaa dabeecada ardayga ee sababaha dugsiga, oo howl walboo dugsiga uu kafaala qaaday, ee gaadiidka dugsiga bixiyo, oo
joogsi walboo baska dugsiga rasmiga ah, iyo dhammaan xaaladaha edbinta ardayga ay quseyso sida lagu sheegay Hab raacyada Edbinta Ardayga 4.30.020-AD. Dabeecada qaar waxay u baahan kartaa in Degmada raacdo habraacyada lagu tilmaamay Arday ku Arday Takoorida Galmada Ku saleysan iyo Jiheynta Maamulka Dhibaateynta 4.30.072-AD, haddii kale, Degmada waxay raacayaan habraacyada laga helo Title IX Jaheynta Maamulka Takooirda iyo Dhibaateynta Ku saleysan ee Arday ku Arday 4.30.072-AD.

## II. Qeexitaano

A. "Dhibaateynta" waxaa loola jeedaa dhammaan noocyada dhibaateynta, cabsi gelinta ama xoogsheegsiga, xoog sheegsiga intarneetka, iyo dhibaateynta galmada, oo ay ku jiraan laakiin kuma xadidno:

1. Cabsi gelin, ama xoog sheegsiga ardayda: fal walboo oo

   a. si weyn u farageliyo faa'idooyinka waxbarashada ardayga, fursadaha, ama waxqabadka iyo

   b. waxay leedahay saameynta waxyeelada jireed ee ardayga ama waxyeelida hantida ardayga, si ula kac ah loo geliyo ardayga cabsi macquul ah oo waxyeelo jireed ama waxyeelo ku ah ardayga ama waxyeelo ku ah hantida ardayga, ama abuurista jawi waxbarasho colaadeed, oo ay ku jiraan faragelinta fayo qabka cilmi nafsiga ardayga iyo

   c. waxaa laga yaabaa inay ku saleysantahay, laakiin aan ku xadidneyn, heerka fasalka illaalsan ee qofka.

2. Xoog sheegisga: isticmaalka aalad walboo isgaarsiin ee lagu

dhibo, lagu cabsi geliyo, ama loogu xoogsheegto.

3. Dhibaateynta galmada ee ardayda: waxaa ku jiro

a. dalabka ixsaanka galmada oo lagu badesho faa'idooyin; dhaqan galmo ee aan la jecleyn oo leh ujeedo ama saameynta faragelinta aan macquulka aheyn ee waxqabadka waxbarashada ardayga ama abuurto jawi waxbarasho cabsi gelin leh, weerar ah ama cadaawad; iyo

b. weerarka markii xiriirka galmada uu dhaco iyadoon jirin ogolaanshaha ardayga sababtoo ah ardayga wuxuuu cabsanyahay daroogo ama alkulo, uu miyir beelsanyahay, ama lagu cadaadiyo xoog jireed, jujuub, ama hanjabaad cad ama maldahan.

4. Rabshada shaliinta shukaansaneyso:

a. Naqshada dabeecada ee qofka uu isticmaalo ama ugu hanjabo inuu isticmaalo xadgudub jireed, damiir, ama xadgudubka dareenka ee lagu xakameeyo qof kale kaasoo ku jiro, ama ku jiray, xiriirka shukaansiga ee qofka, halkaasoo hal qof ama ka badan ay yihiin 13 illaa 19 sanno jir; ama

b. Dabeecada uu qofka isticmaalo ama ugu hanjabo inuu u isticmaalo xadgudubka galmada ee ku aadan qof kale oo kula jiro xiriir shukaansi qof, halkaasoo hal qof ama labo qof ay jiraan 13 illaa 19 sanno jir.

5. Rabshada qoyska: xadgudubka ka dhexeeya qoyska iyo xubnaha qoyska sida lagu qeexay ORS 107.705.

B. Heerka Illaalsan: koox dad ah oo lagu kala soocay, ama loo arkay in lagu kala soocay, jinsiyad ahaan, midab ahaan, diin ahaan, lab/dheddig, dooqa galmada, aqoonsiga jinsiga, asalka dhalashada, xaalada guurka, heerka qoyska, isha daqliga, ama naafonimada.

C. Aargoosiga: la kulmida saameyn xun kadib markii la sameeyo ama la taageero sheegashada Dhibaateyn, oo ay ku jiraan rabshada shukaansiga dhaliinta ama rabshada qoyska, haddii saameynta ay ka joojineyso qofka macquulka ah inuu sameeyo sheegasho noocaas ah.

D. Dooqa galmada: shaqsiga dhabta ah ama loo arko inuu galmo ahaan caadi yahay, laga roone, nimoo-naag, ama aqoonsiga jinsiga.

E. Aqoonsiga jinsiga: dareenka qofka labta ama dhediga iyadoon laga eegin haddii muuqaalka, hadalka, ama dabeecada shaqsiga ay ka duwantahaymida dhaqan ahaan lala xiriiriyo jinsiga qofka dhalashada.

**III. Dhammaan dugsiyada waa inay isticmaalaan xeeladaha cadeynta ku saleysan oo lagu joogteeyo dugsiga-jawiyo balaaran iyo fasalka ee badqab ah, sare u qaad waxbarashada aan la heyn dhibaateyn.**

**IV. Ogeysiinta Xeerka iyo Illaha**

A. Ogeysiinta: Aastaamaha, oo luuqad da'da ku haboon, taasoo sharaxeyso mamnuucida ka dhanka ah dhibaateynta, cabsi gelinta ama xoog sheegsiga, falalka xoogasheegsiga intarneetka, iyo ka aargoosiga waa in la soo dhigaa dugsiyadoo dhan ee fasalka ka hoose 6. Aastaamaha la soo dhigo dhammaan fasalada 6 illaa 12 ee dugsiyada waa inay ku jiraan mamnuucida ka dhanka ah dhibaateynta galmada ee aastaanta ugu yaraanb 8.5 iyo 11 inji cabir ahaan. Waa in sidoo kale lagu daraa sannad walba *Hagaha,* oo laga heli karo xafiiska degmada, oo la dhigo websaydka degmada.

B. Ogeysiinta Ardayga Dugsigoo Dhan: Ardayda waa in lagu soo wargeliyaa qeexida, cawaaqiibaha, iyo waajibka lagu soo sheegayo Dhibaateynta iyo aargoosiga. Tan waxaa lagu gaari karaa qaabka wada hadalka fasalka ama howsha. Waxaa sidoo kale laga helaa Xaquuqaha Ardayga iyo Buug-yaraha Masuuliyadaha.

**V. Soo sheegida Dhibaateynta**

1. Ardayda aaminsan in loo geystay dhibaateyn ama aargoosi waxaa lagu dhiiirogelinayaa inay si degdeg ah u ogeysiiyaan macalinka, la taliyaha, maamulaha, ama shaqaalaha kale ee Degmada. Dugsi walba wuxuu leeyahay Sarkaalka Cabashada Dugsiga (SCO) kaasoo masuul ka ah inuu:

a) helo dhammaan wargelinada xoogsheegsiga dugsiga ku saleysan, dhibaateynta iyo takoorka;

b) sameeyo qorsheynta badqabka ardayga (ardayda) ay saameysay;

c) u dhaqmo sida barta ugu muhiimsan ee xiriirka wargelinada Title IX, baaritaanada iyo waxqabadyada la xiriiro;

d) hubiyo in dhammaan dhacdooyinka si isdhaafsi ah looga wargeliyo DHS, Title IX iwm. SCO'ga hadda ee dugsi walba waxaa la soo dhigaa www.pps.net/titleix

2. Ardayda ka marqaati kaco ama aqoon lagu kalsoonyahay uleh dhibaateynta ama aargoosiga ka dhanka ah arday walba waa inay u soo sheegaan walaacooda macalin, la taliye, maamule, ama sarkaalka Degmada sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah.

3. Shaqaale walboo Degmada ah oo ogaado Dhibaateyn ka dhan arday walba ama kaasoo helo wargelin noocaas ah waa inuu islamarkiiba u soo sheegaa dhaqanka maamulaha dugsiga ama maamulaha kale ee Degmada. Shaqaalaha waa inay sidoo kale u hogaansamaan waajibaadyadooda wargelinta qasabka ah.

**VI. Cawaaqiibaha ka Qeybgalka Dhibaateyn**

Ardayda lagu helo ka xadgudubka jiheyntaan waxaa laga qaadayaa tallaabo edbin oo u dhaxeyso shirka Heerka Kow illaa Heerka afar oo ka saarid/ka saarida la daahiyay/dib ugu qoondeyn ama gudbin. Talaabada edbinta waxay ku xiran tahay tirada dhacdooyinka iyo darnaanta dembiga iyo sida lagu sheegay *Hagaha Habraacyada Masuuliyadaha, Xaquuqaha iyo Edbinta Ardayga (Hagaha)*.

**VII. Habraacyada**

Wargelinada iyo cabashooyinka Dhibaateynta, oo ay ku jiraan rabashada shukaansiga iyo qoyska, waxaa baarayo Degmada iyadoo la raacayo habraacyada lagu tilmaamay Habraacyada Dhibaateynta, Xadgudubka Galmada, iyo Rabshada Shukaansiga Dhaliinta iyo Ka hortaga – Jiheynta Maamulka Ardayda 4.30.071-AD. Ardayda iyo waaladiintooda waxaa lagu soo ogeysiinayaa qoraal ahaan baaritaanka oo waxaa la siinayaa warbixinta ku saabsan illaha iyo taageerooyinka, oo ay ku jiraan warbixinta ku saabsan daaweynada rayidka iyo dambiga, ee ku caawiyo nidaamka.

Eedeymaha ka aargoosiga waa la baarayaa iyo, haddii la cadeeyo, waxay keeni kartaa edbin.

Ardayda waxaay u soo sheegi karaan Dhibaateynta si qarsoodi ah; si kastaba, cadeynta cadeymaha waxaa looga baahanyahay tallaabo walboo edbin ah ama cawaaqiibaha kale.

Shaqaalaha Degmada ee aqoon lagu kalsoonyahay u leh anshaxa la

mamnuucay ee ardayga ama qof weyn ee ka dhanka ah arday walba, waa in islamarkiiba ay u soo sheegaan walaacyadooda sarkaalka dugsiga degmada loo xilsaaray ee ku haboon. Wargelinada anshaxa ku xadgubayo jiheyntaan waxaa lagu sameyn si qarsoodi ah; si kastaba, cadeynta cadeymaha waxaa looga baahanyahay tallaabo walboo edbin ah ama cawaaqiibaha kale.

**VIII. Qarsoodinimada**

Qarsoodinimada: Dhammaan cabashooyinka waa in loo qabtaa sidaas in aqoonsiga cowdaha iyo warbixin walba ee la helay sida qeyb ka ah baaritaanka waa in lagu hayaa qarsoodi illaa iyo xad in qarsoonimada ay la jaanqaadi karto baaritaanka dheer ee cabashada oo waxaa lagu ogolyahay sida waafaqsan sharciga. Degmada waa inay ku dadaashaa inay illaaliso aqoonsiga qofka xareeyo cabashada, ku dhiirogeliyo wargelinta xadgudubyo walba sida waafaqsan xeerkaan. Waaladiinta/Masuulada ardayda ay saameysay waxaa soo ogeysiinayo Degmada.

Qarsoodinimada diiwaanada ardayga: Tallaabo walboo edbin ah ee laga qaado arday waxaa lagu haynayaa qarsoodi si loogu hogaansamo sharuudaha faderaalka ee qarsoonimada diiwaanada ardayga.

Tixraacyada Sharciga: ORS 339.356; ORS 339.366; ORS 107.705; 342.704

OSBA: JFCF

Taariikhda: Waxay badeshaa Xeerka Dhibaateynta iyo Xoog sheegsiga (4.30.060-P) iyo Ka hortaga Cunsuriyada (4.30.061-AD) Waxa ala la badelay 12/10; La badelay 2/15;

Waxaa la qaatay: 6/15/2021